Achieve
MN CENTER FOR PROFESSIONAL DEVELOPMENT

# XUBINIMADA SHAKHSIGA AH



## HAGAHA SAAXIIBKA AH

# Soo dhowow!

Waxaanu nahay Achieve – Xarunta Minnesota ee Horumarinta Xirfada. Waxaanu nahay hal ka mid ah dhowr wakaaladood oo shuraako ah oo ka shaqaynaya Develop si loo taageero mihnadaada xirfadeed oo guul leh carruurnimada hore iyo daryeelka da'da dugsiga! Kooxdadayadu waxay raacdaa hagitaanka iyo xeerarka sare lagu dhigay Waaxda Minnesota ee Adeegyada Aadamaha – Adeegyada Horumarinta Ilmaha si loo hubiyo dhammaan xubnaha Develop in si xaq ah loola dhaqmo muddada nidaamka codsiga. Waxaanu isticmaalnaa nidaamka Develop si loo habeeyo gudbinta codsiga xubinimada iyo in lagu siiyo taageerada xubinimada la gaar yeelay ee ku salaysan baahiyaha iyo hadafyada.

Xubinimada shakhsiga ah ee Develop waa BILAASH oo waxay furtaa albaabka fursado badan oo ah xirfadaada shaqada! Xubinimada Shakhsiga ah ee Develop waxa uu ku siiyaa kartida aad ku:

- Dhisto diiwaan dhammaystiran, sax ah, oo koronta ahaan gaar ah oo guul gaadhidada xirfadaada ah oo ku kaydi xogta kaydka amniga ah ee Develop.
- Soo bandhigto guul gaadhidaada addoo soo bandhigaya shahaadadaada Qaabka Dhaqaaqa Xirfada shaqo
- Ka qayb gasho Wacyiga Waalidka.
- Codsato deeqaha iyo deeqaha waxbarashadda.
- Codso Horumarinta Tababaraha iyo/ama Xidhiidhka Ku salaysan Horumarka Xirfadeed (RBPD) Khabiirka xubinimada.

Waxaanu rajaynaynaa inaanu kaala shaqayno adiga iyo inaan taageerno hafadyada xirfadaada shaqo!

Iyaddoo la qiimaynayo dhammaan waxaad u qabato carruurta Minnesota, dhalin yarada iyo qoysaska.

— Kooxdaada Guul gaadhida



# Tusmadda

Riix batanada la riixi karo ee hoose si loo caawiyo si kolba qayb loo eego dhokumetigan.


3 U diyaar garow Gudbinta Codsigaaga

4 Soo gudbi Codsigaaga

5 Ku qorida Dhokumenti Guulahaaga

6 Heerarka Codsiga

7 Qaabka Dhaqaaqa Xirfada shaqo ee Minnesota

8 Diiwaanka Waxbarashadda



# U diyaar garow Gudbinta Codsigaaga

Noqo mid yaqaana Xeerka Caddaynta La aqbali karo. Waxay muujinaysaa dhokumentiyada Achieve ay isticimaali karto si ay u xaqiijiyo guul gaadhidaada Borofaylka Gaarka ah iyo Diiwaanka Waxabrashadda

## CODSIGA ONLAYNKA AH EE DEVELOP WAXAY KU WAYDIINAYSAA ADIGA WAX KU SAABSAN

### Waxbarashadaada

Waxaad u baahan doontaa inaad qorto taariikaha dhammaystirka. Waxaanu ku talinaynaa inaad ku haysataa warqaddahaaga shaqo iyo/ama digriiyada meel kuu dhow. Waxaad u baahan doontaa inaad u dirto caddaymaha la aqbali karo haddii aad jeclaan lahayd guul gaadhidahan lagu xaiijiyay borofaylkaaga.

### Shaqada

Waxaad awoodi doontaa inaad qorto waayo aragnimadaada shaqo qaynta daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashadda. Waxaa lagu talinayaa inaad ku darto ugu yaraan shaqadaada hadda. Haddii ay suuragal tahay, hayso lambarka Aqoonsiga loo shaqeeyayaaha Develop.

### Tababarka

Dib u eeg taariikhdaada tababarka. Haddii aad qaadatay tababarka oo aan hadda ka hor ku qornayn borofaylka Develop, waxaad soo diri kartaa caddaymaha si looga fiirsado.

## WAXAAD U BAAHAN DOONTAA

### WAKHTIHGA

- 15-20 daqiiqadood oo lagu soo gudbiyo codsigaaga hore
- 5-10 daqiiqadood oo lagu soo gudbiyo dib u cusboonaysiinta codsiga
- 3-6 todobaad ee Achieve si ay u habbayso codsi kasta oo la gudbiyay
  - * Wakhtiyadayada habbaynta hadda waxay kuyaalaan bogga websaydkayaga ee www.mncpd.org
- Dhammaan codsiyada waxaa loo habbeeyaa nidaamka taariikhda, ma jiraan wax ka reeban.

### TEKNOOLAJIGA

- Kombuyuutarka, taableed,a ama telefoonka casriga ah ee ku xidhan internatka.
  - * Codsiga Xubinimada Gaarka ah waa codsiga onlaynka ah ee keliya
- Borofaylkaaga Gaarka ah ee Develop
  - * Haddii aanad weli samaysan Borofaylkaaaga Gaarka ah, arag Samaynta Develop Hagaha Borofaylka Gaarka ah ee tilmaamaha faahfaahsan.



# Soo gudbinta Codsiga Onlaynka ee Xubinimadaada Gaarka ah

Soo gal Borofaylkaaga Gaarka ah ee Develop si loo bilaabo codsigaaga onlaynka ah. Caawimada dheeraadka ah, hubi ama eeg Hagaha Codsiga Xubinimada Gaarka ahee Develop wixii ah tilmaamaha tallaabo-talaabada ah!). Hubso inaad dib u eegto macluumaadka hoose ka hor inta aanad riixin batanka **Submit**.

## MA HAYSAA DHOKUMENTIYO AAD U DIRAYSO ACHIEVE?

### Haa, waxaan hayaa dhokumenti aan dirayo

- Buuxi codsigaaga.
- Riix **Submit**.
- Dib u eeg Xeerka Caddaynta La aqbali karo oo u soo dir dhokumentigaaga la aqbali karo Achieve 15 maalmood gudahood soo gudbinta codsiga.
- Booqo Path A ee bogga 5 si aad u barato sida loogu diro Achieve dhokumentigaaga..

### Maya, ma hayo dhokumenti aan dirayo

- Buuxi codsigaaga.
- Riix **Submit**.
- Hoos ugu soo deg oo riix **I have no documentation  to submit**.
- Riix **Confirm**.
- Tag Dhabada B bogga 5 si aad wax badan u barato.

- Haddii aanad u dirayn dhokumenti Achieve AMA xaqiiji borofaylkaaga Develp inaanad u dirayn dhokumenti 15 maalmood oo shaqo gudaheed addoo riixaya **Submit**, codsigaaga si otomaatiga ah ayaa nidaamka Develop u tirtiri doonaa.
- Haddii aanad hubin haddii aad dirayso dhokumentigaaga, kala xidhiidh Acheive bogga support@mncpd.org wixii ah caawimada dheeraadka ah.

Tani waxay qaadan doontaa

**15 - 20 Daqiiqo**
(Codsiga Koowaad)

**5 - 10 Daqiiqo**
(Cusboonaysiinta Codsiga)

**MA U BAAHAN TAHAY KAALMADA FARSAMADA LAGU BAADHO DEVELOP OO LAGU GUDBIYO CODSIGAAGA?**

La xidhiidh Miiska Caawimada Horumarinta
support@develophelp.zendesk.com

**ILAHA LA XIDHIIDHA**

- Hagaha Codsiga Xubinimada Gaarka ah ee Develop
- Hagaha Degdega ah ee Xubinimada Gaarka ah

# Ku qorida Dhokumenti Guulahaaga

## PATH A: U DIR DHOKUMENTIGAAGA ACHIEVE

Tani waa fursadaada aad ku diro dhokumentiga guul gaadhidaada si loo xaqiijiyo! Hubi ama eeg Xeerka Caddaynta La aqbali karo si aad u barato dhab ahaan waxay yihiin noocyada dhokumentiyada Achieve ay ka xaqiijin karto Borofaylka Shakhsiga iyo Diiwaanka Waxbarashadda. Ugu soo dir dhokumentigaaga Achieve iimayl, boostada, ama fagaska 15 maalmood oo shaqo gudahooda gudbinta qaybta onlaynka ah ee codsiga.

Achieve waxay kuu soo diri doontaa iimaylka xaqiijinta oo waxay ka tegi doontaa Qoraalka Shaqaale guudka Taabka Kooban ee Borofaylkaaga Develop sida ugu dhakhsaha badan ee dhokumentigaaga aanu u hubiyo oo aanu u bilowno habbaynta codsigaaga.

**TILMAAMAHA**

- Ka dalbo qoraalada darajooyinka rasmiga ah dugsigaaga oo si toos ah haloogu diro Achieve.
- Ugu dir koronto ahaan dhokumentigaaga (iimayl ama fagas) si degdeg loogu xaqiijiyo.
- Hubso magacaaga inuu kujiro dhokumenti kasta.
- Ku dar Aqoonsiga Develop dhokumentigaaga.
- Haddii aad u dirto dhokumentiyada Achieve addoo marka koowaad soo gudbin codsiga, waxaa lagu hayn doonaa faylka si loogu habbeeyo codsiga Xubinimada Shakhsiga ah ee xiga ama dib u cusboonaysiinta, waafaqsan Xeerka Haynta Dhokumentiga. Achieve waxay kuu soo diri doonaan iimaylka xaqiijinta ku ogaysiinaya inaanu helnay dhokumentigaaga iyo tallaabooyinkaaga xiga si dib loogu eego oo loo xaqiijiya.
- Uma baahnid inaad dib ugu dirto dhokumentigan Achieve hadda ka hor faylka ku jira.

## PATH B: BATANKA AAN DHOKUMENTI JIRIN

Waxaad had iyo jeer dooraataa in AANAD dirin dhokumentiga codsiga Xubinimada Shakhsiga ah ama dib u cusboonaysiinta! Waxaa jira sababa badan oo aad ku dooranayso tan, ay ku jiraan:

- Waxaad dirtay dhammaan dhokumentiyadaada muddada codsigaagii u dambeeyay ama dib u cusboonaysiinta.
- Waxaad dirtay dhokumentiga addoon dib u cusboonaysiin oo dhokumentigaaga weli lama habbayn?
- Waxaad keliya qaadatay tababarada koronto ahaan lagu daray diiwaankaaga waxbarashadda ilaa codsigaagii u dambeeyay ama dib u cusboonaysiinta.
- Wakhti uma haysid hadda si loo helo oo loo diro koobiyada shahaadooyinkaaga tababarka.

Wax kasta oo sababtu tahay, waa inaad ku xaqiijisaa doorashad Borofaylkaaga Shakhsiga ah ee Develop 15 maalmood gudahood gudbinta codsigaaga onlaynka ah.

Fadlan riix "Ma haysto dhokumenti aan gudbiyo" haddii aanad dhokumentiyo u dirayn Achieve.

Ma haysto dhokumenti aan gudbiyo


support@mncpd.org

877-379-2467

**Achieve**
**2908 Marketplace Dr**
**Suite #103**
**Fitchburg, WI 53719**


**ILAHA LA XIDHIIDHA**

- Xeerka Caddaynta La aqbali karo
- Sida loo Helo Dibloomadaada Dugsiga Sare
- In la Diro ama Aan la dirin?
- Sababtee Ayaad Dib ugu Cusboonaysiinaysaa Xubinimadaada Shakhsiga ah Marka aad Gudbiso Dhokumentiga?



# Heerarka Codsiga

Xaga Achieve, codsigaaga waxaa loo habeeyaa si degdeg ah sida saxda ah ee suuragalka ah. Dhammaan Xubinimada dhammayska tiran ee codsiyada Develop waxaa lagu habbeeyaa Achieve nidaamka taariikhda ah. Tani waxay xaqiijisaa codsigaaga in loo habeeyo si xaq ah oo waxay ugu soo jeedisaa dareenka si faahfaahsan oo sax ah inaad u qalanto baahiyahaaga horumarka xirfadeed.

Codsigaaga Xubinimada Shakhsiga ah waxa uu dhex maraa tallaabooyinka taxanaha ah, ee hoos lagu muujiyay. Soo gal borofaylkaaga Develop si aad u aragto heerka codsigaaga ee ku yaala taabka Summary.

### Waxba (banaan)

Waxaad haysan doontaa Borofaylka Shakhsiga gudaha Develop, laakiin maad noqon xubin.

### La codsaday

Waxaad gudbisay codsigaaga onlaynka ah. Waa inaad caddayn u dirtaa ama riixida batanka **I have no documentation to submit** si aa du dhammaystirto nidaamkan codsiga ah.

### Qoraalada La helay

Achieve waxay heleen dhokumentigaaga oo waxay habbaynaysaa codsigaaga. Codsigaaga waxaa la soo af jari doonaa 42 maamood taarikhda Qoraaladaada La helay.

### Ku jira nidaamka

Achieve waxay dib u eegaysaa codsigaaga oo waxay xaqiijinaysaa dhammaan waxbarashadda la aqbali karo iyo saacadaha tababarka.

### La hakiyay

(Caadi maaha) Waxaa lagugu wargelin doonaa heerkan isbeddelka ah, ka eeg iimaylkaaga wixii macluumaad dheeraada ah.

### La soo Af jaray

Codsigaaga waa la soo afjaray! Qaabka Dhaqaaqa Xirfada shaqo waa la abaal mariyay oo waxay sugayaan hubinta sax ahaanshaha u dambaysa.

### Hadda

Hadda waxaad xubin ka tahay Develop! Waxaad arki kartaa oo ka daabici kartaa Qaabka Dhaqaaqa Xirfada shaqo Qaybta Warbixinaha Borofaylkaaga.

### Muddadu dhacday

In dheeraad ah ma tihid Xubin firfircoon oo Develop ah Fadlan cusboonaysii Xubinimadaada Shakhsiga ah.

Tani waxay qaadan doontaa Achieve

**3 - 6 Todobaad**

**MARKAAD GUDBISO CODSIGAAGA ONLAYNKA AH, IN DHEERAAD AH MA BEDDELI KARTID BOROFAYLKAAGA ILAA CODSIGAAGA LA HABBEEYO.**

La xidhiidh Miiska Caawimada Horumarinta support@develophelp.zendesk.com Haddii wax ka beddel lama huraan yihiin.



# Qaabka Dhaqaaqa Xirfada shaqo ee Minnesota

Qaabka Dhaqaaqa Xirfada shaqo ee Minnesota waxay muujisaa labba iyo tobanka tallaabo ee mihnadaha shaqo ee kuwan ka shaqaynaya carruurnimada hore iyo qaybta daryeelka da'da dugsiga ay gaadhi karaan inay hore ugu dhaqaaqado mihnadahooda xirfadeed. Waxay ka caawisaa loo shaqeeyayaashu inay aqoonsadaan musharaxiinta u qalanta ee boosaska furan, oo waxaa loo isticmaalaa Child Care Aware of Minnesota Grants iyo Scholarship Programs, siiba Parent Aware.

Markaad noqoto Xubinta Shakhsiga ah ee Develop, waxaa lagugu abaal mariyaa shahaadada Qaabka Dhaqaaqa Xirfada shaqo oo ku salaysan guul gaadhidada la xaqiijiyay. Waxaad ka daabici karaa Shahaadadaada Qaabka Dhaqaaqa Xirfada shaqo taabka **Warbixinaha** Borofaylkaaga Shakhsiga ah.

Arag Qaabka Dhaqaaqa Xirfada shaqo ee Minnesota si loo barto wax ku saabsan shuruudaha tallaabo kasta..


Achieve
MN CENTER FOR PROFESSIONAL DEVELOPMENT

Certificate of Achievement

Jane Smith

has completed all requirements for

Step 10a

on the Minnesota Career Lattice.

Nicole Lopez Purkapile, Executive Director
Achieve-MN Center for Professional Development

Individual ID: 12345

Expires: Saturday, April 30, 2022

Qaabka Dhaqaaqa Xirfada shaqo iyo Xubinimada Shakhsiga ah ee Develop waxay ansax tahay 1 sano. Marka muddadu dhacdo, weli waxaad soo geli doontaa Borofaylkaaga Shakhsiga ah iyo Diiwaanada Waxbarashadda, laakiin waa inaad u gudbisaa dib u cusboonaysiinta codsiga si ay u sii wadaan una xiiseeyaan dheefaha dheeraadka ah ee Xubinimada Shakhsiga ah.

Dib u cusboonaysiinta Xubinimada Shakhsiga ah waa degdeg, wayna fududahay, waana bilaash! Develop xataa waxay soo diri doontaa iimayladaada xusuusinta marka ay tahay wakhtigii dib u cusboonaysiinta.

### ILAHA LA XIDHIIDHA

- Dhaqaaqa Xirfada shaqo
- Hagaha Mihnaca Onlaynka ah
- Xeerka Shaqada Kooraska Waxbarashadda Sare
- Looxa Shaqada
- Deeqda Wacyiga Daryeelka Ilmaha iyo Deeqaha Waxbarashadda
- Wacyiga Waalidka (Parent Aware)

Haddii aanad haysan dibloomada dugsiga sare ama GED, weli waxaad noqon kartaa xubin! Si kastaba ha ahaatee, ma shaqaysan kartid Qaabka Dhaqaaqa Xirfada shaqo xaga sare ee Wacyigelinta Aasaasiga ah.

Sahami Hagaha Achieve ee Mihnadaha Onalynka ah si aadu barato sida Qaabka Dhaqaaqa Xirfada shaqo uu kuu caawin karo inaad qorshayso mihnada daryeelka guusha leh ee carruurnimada hore iyo daryeelka da'da dugsiga!



# Diiwaanka Waxbarashadda

Diiwaanka Waxbarashadda waa sawirka kooban ee guul gaadhida horumarka xirfadaada. Waxay caawin kartaa oo awood kuu siin kartaa xiliga mihinadaada shaqo oo dhan. Waxaa looga fekeraa caddayn la aqbali karo oo waxbarashadaada la xaqiijiyaya ah, shaqada, aqoonsiyada, iyo tababarka qaybta carruurnimada hore iyo daryeelka da'da dugsiga. Waxaad u soo bandhigi karaa Diiwaankaaga Waxbarashadda:

- Ruqsad haystayaasha
- Loo shaqeeyayaasha La filayo
- La taliyayaasha Horumarinta Xirfadeed
- Wakaalada kale ee shuraakada ah gudaha Nidaamka Horumarka Ilmaha Minnesota

Saddexda nooc ee Diiwaankaaga Waxbarashaddu waxaa laga heli karaa si loo soo dejiyo borofaylkaaga Develop. Mid kastaa waxa uu ka kooban yahay macluumaadka la xaqiijiyay, loo abaabulay qaabab kala duwan si ay qaab wanaagsan ugu buuxiso baahiyahaaga. Xubnaha Develop waxay arki karaan taabka **Warbixinaha** ee borafaylka shakhsiga ah si ay si ay wax badan uga bartaan nooc kasta oo Diiwaanka Waxbarashadda ah.

## 2 QAAB OO LAGU XAQIINAYO GUUL GAADHIDAADA DIIWAANKA WAXBARASHADDA

**1** **Soo xaadir tababarada lagu xayaysiiyo Jadwalka Raadinta ee Tababarka Develop.** Tababarada lagu xayaysiiyay Jadwalka Raadinta iyo Tababarka Develop waa la ansixiyaa oo waxaa koronto ahaan lagu xaqiijin karaa Diiwaankaaga Waxbarashadda! Ula xidhiidha Adeeg bixiyaha Tababarka si toos ah si aad u aragto haddii ay bixiyaan adeegan.

**2** **Soo gudbi codsiga xubinimada cusub ama la cusboonaysiinta oo u dir Caddaynta La aqbali karo ilaa Achieve.**
Arag boggaga 4 iyo 5.



**TILMAAN**

Kala xidhiidh support@mncpd.org su'aalo kasta ama walaacyada ku saabsan macluumaadka la xaqiijiyay ee Diiwaankaaga Waxbarashadda. Waxaad xaq u leedahay naad codsato dib u eegida rasmiga ah ee Diiwaankaaga Waxbarashadda haddii aad rumaysan tahay macluumaadka in si khalad ah loo xaqiijiyay. Isticmaal foomka Codsiga Dib u eegida Diiwaanka Waxbarashadda si aad u bilowdo nidaamka.

**ILAHA LA XIDHIIDHA**

- Develop' Hagaheeda Sida loo Daabaco Hagahaaga Diiwaanka Waxbaashadda
- Develop Agabkeeda Tababarka Raadinta
- Xeerka Caddaynta La aqbali karo
- Foomka Codsiga Dib u eegida Diiwaanka Waxbarashadda

La xidhiidh support@develophelp.zendesk.com wixii ah soo dejinta caawimada farsamada iyo daabicida diiwaankaaga waxbarashadda.

Si waafaqsan Xuquuqaha Waxbarashadda Qoyska iyo Xeerka Gaar ahaanshaha 1974 (FERPA) Diiwanaadaada Waxbarashadda looma shaacin karo kooxda saddexaad, iyaddoon wadan oggolaanshahaaga qoran ee hore.



# Guul ka Gaadh Hadafyadaada Adoo Nala jira!

**La xidhiidh Achieve - Xarunta MN ee Horumarka Xirfadeed!**

Isniinta - Jimcaha, 7:30 Subaxnimo - 4:30 Galabnimo

support@mncpd.org

855-378-3131

877-379-2467

2908 Marketplace Dr Suite #103
Fitchburg, WI 53719

www.mncpd.org

Facebook.com/MNCPD

